

Diyaarinta Nadiifinta Caloosha:

Beeritaanka saxarada oo qofka lagu shubayo

Baaritaanka Kahor 1 ka Duhurnimo

Miralax

Waa muhim in aad raacdo **dhamaan** tilmaamaha lagu siyo ee u diyaargarowga baaritaanka. Waa in jirkaagu nadiif ahaadaa sidoo kale si dhakhtarku u arki karo xilliga baaritaanka. Dadka qaar baa u arka in baaritaanka qeybta ugu adag ay tahay diyaarinta caloosha.

Isu Diyaarinta Baaritaanka

Ha cunincunto adag **gebi ahaan** maalinta ka horeysa baaritaanka. Wuxuu aad isticmaaleysaa **Miralax iyo Dulcolax** ee nadiifinta mindhicirada.

Haddii aad horey kelyaha uga jiratay ama qabto cudurada kelyaha, ha **qaadan Miralax** ee nadiifinta caloosha oo la xiriir dhakhatarka kuu qoray beeritaanka saxarada.

Fadlan raac dhamaan tilmaamaha. Haddii **aadan** si haboon u raacin tilmaamaha waxaa suurogal ah in la **baajiyo** eegidda mindhiciradda. Si aad ugu diyaargarowdo eegidda mindhicirada, waxaa lagaa doonayaa inaad iibsato waxyaabaha caloosha lagu nadiifiyo.

Daawada aad iibsaneyso :

- Afar kiniin oo Bisacodyl/Dulcolax ah (5mg). Waa in aad kiniink afka ka qaadataa.
 - Miralaxa (8.3 wiqiyadood/238 garaam)
- (Uma baahnid in dhakhtar kuu qoro)

Wuxuu aad ka heleysaa dukaanka aad ka adeegato:

- Gatorade (64 ounces) nooc kasta aan ka aheyn **casaan ama hurdi**.
- Waad iibsan kartaa **laba** xabo oo midiiba tahay 32 wiqiyadood.

Waxaa ku soo wacaya kalkaaliye caafimaad oo qaabilan diiwaangelinta 5 ilaa 7 cisho ka hor baaritaanka. Wuxuu ay ku weydiinayaan su'aalo kaa caawinaya u diyaargarowga baaritaanka, waxaa ay kaala hadlayaan caafimaadkaaga; waxxayna kaa caawinayaan daawada aad qaadato ka hor iyo ka dib baaritaanka. Haddii aad qabto **wax** su'aal ah oo ku saabsan tilmaamaha, fadlan soo wac **(320) 229-4974** Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8da aroornimo ilaa 4ta galabnimo. Waxa kale oo aad soo wici kartaa 1-844-795-1734. Haddii aad rabto inaad bedesho balanta, fadlan soo wac **(320) 229-4933**.

Shan (5) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

- **Ha qaadan** qaadan daawooyinka shubanka joojiya – Sida: Imodium ama Pepto-Bismol.
- **Ha qaadan** daawooyinka saraxada jiliciya – Sida: Metamucil ama Citrucel.
- **Ha qaadan** fatiimanada birta dhiiga xoojiya – Sida: Multi-vitamins.
- **Ha qaadan** fatimiin E ama daawada:

Sadex (3) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

Wax yar oo cuntada caloosha jilicisa ku bilow - Ha qaadan cuntada aad caloosha u jilciya tusaale ahaan: Daangada, miraha (gabaldaya, lawska iyo salbukada), rootida sareenka ka sameysan, miraha la qariido, ansalaatada, qudaarta ceyriin, ama markaa la soo jaray ama qalalan. Xadid inta aad hilibka ka cunto.

Laba (2) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

Biyo badan cab (sideoor galas oo biyo ayaa lagula talinayaa).

Hal (1) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

- Biyo cad oo kaliya cab **maalinta oo dhan** maalinta ka horeysa eegista mindhicirka. **Ha cunin** cunto adag
- 9ka aroornimo., qaado afarta kiniini ee Bisacodyl/Dulcolax. Ku dar Miralax oo dhan (dhalada oo dhan) ee dhamaan 64 wiqiyadood oo Gatorade ah oo isku mil. Haddii aad jeceshahay waxa aad gashan kartaa talaajada Ku darin baraf.
- Haddii aad jeceshahay inaad cabto iyada oo aan la qaboojin, ka soo saar talaajada **4ta duhurnimo**.
- **6da maqribnimo** bilow inaad cabto Miralax iyo Gatorade la isku qasay. Waa inaad cabtaa kala bar **kala bar** (32 wiqiyadood) oo waxa la isku daray. Isku day inaad cabto **galaas sideoor waqiyadood** ah **15kii daqiiqaba**.
- Waa inaadan ka fogaan suuliga marka aad bilowdo inaad cabto Magnesium Citrate. Waxaa kugu dhacaya shuban waxaadna dooneysaa inaad markiiba musqusha gaarto. Dadka qaar baa dareema yalaalugo, dibiro ama matag. Haddii ay taasi dhacdo, ka naso 15-30 daqiiqo ka dibna isku day inaad cabto waxyabaha aad isku qastay.
- Ka dib marka aad dhameyso waxyabaha la isku qasay, **waxa aad cabi kartaa biyo cad oo kaliya**.
- Ha qaadan galabta horeysa balanta **Vancomycin**. Haddii aanu dhakhtarku sidaas ku farin.

- **Saqda dhexe** jooji cabitaanka biyaha cad. Markaas waad dhameysay **dhamaan** waxyaabihii qasnaa ee aad diyaarsatay.

Maalinta beeritaanka saxarada

- **3da aroornimo.**, bilow inaad cabto barka haray ee waxyaabaha aad isku dartay (32 wiqiyadood).
- Waa inaad cabtaa **sideed wiqiyadood** koob ah **15kii daqiiqaba** ilaa aad ka dhameyso. Waa khasab inaad dhameyso **dhamaan** cabitaanka aad qasatay. Waa in aad cabitaanka dhameysaa **4ta aroornimo**.
- Waxa aad cabi kartaa **biyo** kaliya ilaa **afar saacadood ka hor** balanta aad ku **tageyso**. Waxa aad qaadan kartaa daawada **adiga oo biyo yar ku kabanaya**.
- Xusuusnoow inaadan qaadan Vancomycin ama daawada lagu daweyyo cudurada bakteeriyadu keento. Haddii aanu dhakhtarku sidaas ku farin.
- Xusuusnoow **ha cunin unto adag**.

